



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Juun 8, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Fursada Shaqaaleysiinta iyo Deeqda Lacageed ee Sii Haysashada Shaqada

Iyada oo laga jawaabayo dhibaatooyinka dhanka shaqaalaha iyo yaraanshaha shaqaaleysiinta ee soo wajahay hay'adaha daryeelka bixiya oo uu sabab u yahay cudurka baahsan ee COVID-19, Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) waxay sameynaysaa maalgelin hal mar ah oo ay helayaan daryeel bixiyayaashu oo loogu talagalay dadaalada dhanka shaqaaleysiinta iyo sii haysashada shaqada. Maalgelintani waa mid si gaar ah loogu talagalay oo ah abaalmarin iyo qorshayaal lagu taageerayo shaqaaleysiinta iyo sii haysashada shaqaalaha bixiya daryeelka tooska ah (oo ay ka mid yihiin balse aanay ku koobnayn, Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah iyo Xirfadlayaasha Shaqada). Hay'adaha la shaqeynaya shaqaalaha qandaraaska la siiyay oo kaliya (halkii ay ku noqon lahayd shaqaalaha) uma qalmaan deeqdan lacageed.

ODDS waxay codsiyada deeqda lacageed siin doontaa hay'adaada Juun 9, 2021, waxayna u baahan doontaa waqti dhan hal toddobaad si loo hubiyo in maalgelintan loo bixin karo sida ugu dhakhsaha badan. Si lagaaga caawiyo in aad hore u sii diyaar garowdo, waxyaabaha qaarkood ee looga baahan yahay soo jeedinta deeqda lacageed waxaa ka mid noqon doona: aqoonsiga qorshayaasha ay hay'adaadu u adeegsan doonto maalgelintani, iyo sida hay'adaadu u xaqiijin doonto ilaalinta diiwaannada loogu talagalay xisaabinta/hanti dhawrka iyo warbixinta kama dambeysta ah ee ku socota ODDS. Tirada deeqda lacageed waxay ku saleysnaan doontaa tirada dadka loo adeego iyo adeegyada la bixiyo.

Waxyaabaha qaarkood ee maalgelintani loo isticmaali karo waxaa ka mid ah:

- Abaalmarinta shaqaaleysiinta iyo sii haysashada shaqada;
- Magdhow la siiyo dadka bixiya daryeelka tooska ah si meesha looga saaro caqabadaha shaqada sida gaadiidka iyo daryeelka carruurta;
- Abaalmarinta dhanka tallaalka; iyo
- Istiraatijiyadaha shaqaaleynta oo hal-abuur leh.

Dadaalada dhanka shaqaaleysiinta iyo sii haysashada shaqada ee la xiriirta maalgelintani waa in la dhammeystiraa muddo aan ka dambeyn Diisambar 31, 2021. Wixii maalgelin ah ee aan la isticmaalin waa in la soo celiyaa waqtiga la joogo warbixinta kama dambeysta ah.

Waan ka mahad celinaynaa dadaalada ay daryeel bixiyayaashu sameeyeen si ay u xaqiijiyaan caafimaadka iyo badbaadada inta lagu jiro cudurka baahsan ee COVID-19. Waxaan rajeynaynaa in fursadan maalgelin ay taageeri doonto shaqadaada muhiimka ah.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.